

# Khadka Telefoonka cusub ee warbixinta Coronavirus oo loogu talagalay dadka ajaanibta ah

Telefoonkan ayaad soo wici kartaad si suaalaha caamka ah ku saabsan Coronavirus ugu heshid jawaab. Khadka telefoonku wuxuu furanyahay maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 09:00–12:00 iyo 13:00–15:00

Khadka telefoonka waxaa kuugu diyaar ah la taliyayaasha caafimadka ee ka shaqeeya xarunta Transkulturellt Centrum oo ka jawaabaya wixii suaala caam ah oo ku saabsan Coronovirus. Waxay la taliyayaasha caafimaadku ku hadlayaan

Iuqadaha kala ah Soomali, carabi, Dari, faarsi, tigrinya, amxaari iyo af ruushka.

Khadka telefoonka namberkiisu waa 08-123 680 00. Qofka soo garaaca cod ingiriis ah oo uu dabasodo midacarabi ah ayuu maqlayaa kadib ayuu luqadda uu rabo dooran karaa.

Marka khadka telefoonka waqtisu xiran yahay waxaa ku duuban fariin iuqadaha ingiriiska iyo carabiga ah ka hadlaysa waqtiyada khadku furanyahay, kuuna tilmaamaysa 1177 iyo 112

## Waa wargelin caam ah oo Coronaviruska – Maaha katalobixin caafimaad (sjukvårdsupplysning)

Khadka telefoonkan looguma talogelin talobixin caafimaadka dadka iyo caawimaad ku saabsan xanuun qof bukaan ah u gaar ah in laga bixiyo. Caawimaada iyo talobixinta noocaas ah waxaa laga heli karaa 1177. Khadkan waxaa loogu talagalay in akhbaar ama maclumaaad caam ah oo ku saabsan Coronoviruska laga helo. Taas oo muhiim ah si fiditaanka cudurku u yaraado, sida:

- Waa maxay Coronavirus?
- Sidee layskugu gudbiyaa?
- Sidee layskaga ilaaliyaa?
- Maxaa loo leeyahay guriga joog ama guriga shaqadaada ku soo qabo?
- Sidee fiditaankiisa looga hortegi karaa?
- Maxay u fiicnayn in la booqdo ayeeyo?
- Wax dawo ah ma leeyahay Coronavirus?
- Maclumaaad iyo war luqado kala duwan ah xagee laga heli karaa?

## La taliyayaasha caafimaadka (hälsokommunikatörer)

Waxay leeyihiin khibrad shaqo 10 sano ah oo ku saabsan ka talobixinta iyo wacyigelinta caafimaadka ay siiyaan dadka ajaanibta ah ee dadlka waqtiga yar joogay. Waxay la taliyayaasha caafimaadku ka soo jeedaan dalal kala duwan, waxayna cilmi u leeyihin caafimaadka iyo caafimaadka bulshada

Ujeedada khadka telefoonkan laga leeyahay waxay tahay in culayska looga kala yareeyo 1177 vårdguiden iyo in wax la gaarsiyo dadka ajaanibta ah. Waxaa soo diyaariyey khadkan telefoonka SLSO iyadoo la kaashanaya shaqaale masuul ahoo ka tirsan Hayadda Caafimaadka, Hälso- och sjukvårdsförvaltning